

NOQO MID DIIRAN OO WARQABA

CIMILADA LA XIRIIRTA HAWADA

Marka cimilada xagaaga/qaboobaha ay ku qasabto in fasallada la joojiyo, waa inaad isla makriiba ogaataa!

Dugsiyada Magaalada Columbus waxay diyaad u yihiin ku soo noqoshada xilliga xagaaga/qaboobaha iyo marka ay maalmaha cimiladu ay aadka u xuntahay oo ay saamayn weyn ku yeelan karto maalinta dugsiga ee ilmahaaga... iyo maalintaada mashquulka badan. Hubi inaad horay u sii qorshaysato.

MAR WALBA KU XIRNOW: wararka ku saabsan joojinta waxbarashada, u gudubka waxbarashada meel ka baxsan dhismaha dugsiga, hawlaha dheeraadka ah ee ka baxsan manhajka, safarada dibadda ka ah dhismaha, iyo/ama dhacdooyinka ciyaaraha-ardayda waxaa loo wadaagaa siyaabo dhowr ah.

- Hubi in macuumaadka xiriirka ee ku jira faylka dugsiga ilmahaaga uu yahay mid sax ah. Haddii aad u baahan tahay inaad cusboonaysiiso macluumaadkan, la xiriir xafiiska guud ee dugsiga ilmahaaga ama gal Xarunta Xiriirka Waalidka. (Tani waxaa ku jira xiriirada degdega ah, lambarrada taleefoonka, iyo ciwaanka iimaylka).
- Xasuusi ardaygaaga inuu guriga keeno Kombuyuutarkooda/Chromebook-gooda iyo in la cabeeyo/dab la siiyo habeen kasta; waana in go'aan laga gaaro in loo gudbo waxbarasho meel ka baxsan dhismaha dugsiga
- Kala soco **Dugsiyada Magaalada Columbus Facebook** -geena yod Twitter -keena ama ka eeg bogeena, waxaan kula wadaagi doonaa wararka ku saabsan "maalmaha barafka" iyo joojinnada kale oo ay la socoto fariin degdeg ah oo kuugu soo dhacda taleefoonkaaga ama tablet-kaaga.
- Dhammaan qoysaska iyo shaqaalaha waxaa lagu wargelin doonaa iyada oo si toos ah looga wici doono nidaamka teleefoonka degmada.
- Kala soco wararka talefishinka iyo idaacadaha maxaliga ah.

YELO QORSHE KAAB AH: Marka cimilada xun ay saamayso safarka shaqada subaxii, hogaankeenu wuxuu qorsheeyaa inuu go'aamiyo in la joojiyo fasallada ugu dambayn **5:30 a.m. Haddii cimilo xun la saadaaliyo galamnimada**, fasallada waxaa laga yaabaa in la kala diro goor hore oo ah duhurkii. Hayso qorshe ka duwan maalinta ilmahaaga oo horey loo dejiyay.

- **Kormeer:** cunugaaga mas'uul ma ka yahay inuu keligii guriga joogo mise waxay u baahan yihiin qof la jooga?
- **Cunto caafimaad leh:** ma jirtaa cunto nafaqo leh oo u diyaar ah ilmahaagu inuu cuno quraac iyo qado?
- **Goob Amaan:** haddii fasallada la fasaxo goor hore, ilmahaagu ma aadaa guriga ama meel kale? Haddii ilmahaagu ka yar yahay da'da 8-da, ma jiraa qof kula kulma boosteejada baska.
- **Ka qayb-galka Wax qabadyada:** waa maxay wax-qabad-yada bad-qabka leh ee aad u haysid ilmahaagu inuu sameeyo haddii ay guriga joogaan waqti aan laga filanaynin?

Jawaabaha Su'aalaha Inta Badan **La Isweydiyo, Booqo www.ccsch.us/weather.**



**COLUMBUS
CITY SCHOOLS**